



Farriintani waxaa la soo geliyay iyada oo ah Ingiriisi waxaan si dhakhso ah loo soo gelin doonta iyada oo ah Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt at: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.

Janaayo 14, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Warbixinta La xisaabtanka Daryeel Bixiyaha

Sanadkii la soo dhaafay, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon (ODDS) waxaa ka go'naa in uu abuurdo warbixin loogu talagalay Sharci-dejinta Oregon taasi oo soo jeedinaysa isbeddel dhanka sharciga ah oo wanaajin doona awooda gobolka si loo xaqiijiyo daahfurnaanta daryeel bixiyaha, isla xisaabtanka, badbaadada iyo heerarka tayada.

Warbixinta, "Warbixinta La xisaabtanka Daryeel Bixiyaha ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon," waa mid dhammeystiran waxaana laga akhrisan karaa [internet-ka iyada oo ku qoran Ingiriisi](#). Waxaanu soo gelin doonaa warbixinta iyada oo ku qoran [Af Ruushka](#), [Soomaali](#), [Simplified Chinese](#), [Isbaanish](#) iyo [Vietnamese](#) isla marka turjumaadaha la dhammeystiro.

Warbixinta, ODDS waxay soo jeedinaysaa sagaal talo bixin oo muhiim ah oo:

- Kordhin doonta daahfurnaanta daryeel bixiyaha, iyada oo aan la eegayn qaab-dhismeedka shirkadda ee hay'ada.
- Taageeri doona daacadnimada adeegyada la siiyo dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo qoysaskooda.
- Kordhin doona hadafkeena wadajirka ah ee taageerada dadka reer Oregon ee qaba I/DD in ay yeeshaan nolol buuxda.

Waxaan filaynaa in talo soo jeedintani la tixgelin doono inta lagu jiro kulanka sharci-dejinta ee Febraayo.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka oqow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.

